# Khayraadka iyo Taageerada Kaqaybgalaha Early Achievers

Waaxda Waxbarashada Hore waxaa ka go'an inay xaqiijiyaan inay ka qaybgalayaasha Early Achievers helaan noocyo kala duwan oo khayraadka iyo taageerada ah si ay u caawiyaan hadafka horumarinta tayadooda.

---

**Tabobar – Tabobarrada aasaasiga ah ee kusaabsan nuxurrada la xidhiidha nidaamka ugu wanaagsan ee shaqada**

Tabobarka Taxanaha ah ee Xirfadlayaasha ee Early Achievers waa u bilaash cidda Lagala Xidhiidhayo Dugsiyada Hoose/Dhexe iyo Kuwa Sare ee xarumaha ka qaybgalaya. Taxanaha waxa uu ka kooban yahay lix tabobar oo loogu talogalay fahanka guud ee Early Achievers, meelmarka dhaqameed, u-diyaar ahaanshaha dugsiga, iyo nuxurro kale oo muhiim ah. Saddex kamid ah lixda tabobar waxaa lagu bixiyo onlayn ahaan saddexna waa sida caadiga ah, tabobar qofku kasoo qaybgalayo. Si loo sugo inay dhammaan kaqaybgalayaashu helaan, dhammaan tabobarrada waxaa lagu bixin doonaa qofka oo soo doonta oo waxaana lagu bixin doonaa luuqado badan.

**Hagid – Taageero shakhsi ahaaneed oo horumar joogto oo tayada ah**

Hagidda waxaa helaya dhammaan xarumaha inta ay kaqaybgalayaan. Tabobarayaashu waa shaskhiyaad aad loo tabobaray oo khibrad dheer u leh waxbarashada wakhtiga hore si ay u caawiyaan inay guulaystaan kaqaybgalayaasha Early Achievers taas iyadoo loo marayo kaalmo iyo taageero bartilmaameedsan oo joogto ah. Taageerada hagiddu waa kuwo si gooni ah loogu diyaariyay inay soo buuxiyaan baahida xarunta kasta, oo waxaana ka mid noqon kara:

- Kaalmo leh hadafyada aqoonsiga hormarinta tayada iyo taakulada si loo hormariyo natiijada carruurta oo loogu diyaariyo guulaysiga dugsiga.
- Taageerada Farsamo ee codsiyada Early Achievers, oo ay ku jiraan gargaarka MERIT.
- Khayraadka iyo qalabka la xiriira meelaha heerka tayada Early Achievers iyo agabka qiimaynta.
- Kaalmada u-diyaargarawga qiimaynta goobta shaqada.
- Tilmaamaha fahanka iyo isticmaalka darajaynta iyo qiimaynta macluumaadka Early Achievers si loo sii wado horumarinta tayada ee carruurta iyo qoysaska.
- Curinta Qorshaha Horumarinta Tayada oo ku salaysan baahida gaarka ah iyo mudnaanta kaqaybgalayaasha.
- Helitaanka khayraadka si loo taageero gaarista hadafyada.

**Abaalmarinada Horumarinta Tayada – Abaalmarin lacageed oo lagu aqoonsanayo laguna**



Washington State Department of Early Learning

**taageerayo inuu korriinku tayo yeesho**

Kaqaybqaatayaasha la darajeeyey ee u shaqeeya carruurta aan da'da dugsiga ahayn kuwaas oo hela kaabista daryeelka carruurta ee gobolka waxay u qalmaan inay helaan Abaalmarinada Horumarinta Tayada. Abaalmarinahan waxaa lagu aqoonsadaa guusha

waxayna xarumaha ka taageeraan inay hirgaliyaan hadafyada horumarinta tayada, sida lagu sheegay Qorshaha Horumarinta Tayada. Lacagaha abaalmarintu waxay u dhexeeyaan, $1,000 ilaa $9,000, kaas oo ku xidhan nooca xarunta iyo heerka darajaynta.

**Magdhawga Kaabiska Tiered – Gunnooyinka daryeel-bixiyayaasha aqbala kaabista gobolka**

Daryeel-bixiyayaasha kaqaybgalaya Early Achievers oo u adeega carruurta iyo qoysaska hela kaalmada Daryeelka Carruurta ee Ku Xiriirinta Shaqada (Working Connections Child Care "WCCC") waxay xaq u yeelan karaan in ay helaan lacag-celinta kaalmada oo badan.

- Kaqaybgalayaasha Early Achievers ee aan wali la darajaynin waxay helaan korodh 2% ah oo sicirka salka kaabista WCCC ah 30 bilood ee ugu horreeya ee kaqaybgalka.
- Xarumaha lagu qiimeeyay Heerka 3 – 5 waxay u qalmaan inay helaan gunnooyin ka badan oo dheeraad ku ah sicirka salka kaabista WCCC. Gunnooyinkani waxay u dhexeeyaan 4% ilaa 20%, kaas oo ku xidhan nooca xarunta iyo heerka darajaynta.

**Deeqda Waxbarasho – Kaalmo dhaqaale oo horumarka aqoonta kaqaybgalayaasha ah**

Deeqaha waxbarashada ayaa u diyaar ah dhammaan xubnaha shaqaalaha kaqaybgalayaasha xarumaha Early Achievers si ay uga taageeraan hadafyadooda horumarinta xirfadeed ee joogtada. Waxaa jira laba nooc oo ah deeqda waxbarashada ee la heli karo:

- Deeqda Early Achievers, oo ay maamusho Guddiga Gobolka ee Bulshada iyo Kuuliyadaha Farsamada, waxaa heli kara xirfadlayaasha ka shaqeeya daryeelka carruurta si ay u helaan Shahaadada Digriiga Hoose Waxbarashada Carruurrnimada Hore (ECE) iyo shahaadooyinka ECE ee gobolku bixiyo.
- Deeqaha Waxbarasho ee Child Care Aware of Washington waxaa heli kara xirfadlayaasha ka shaqeeya daryeelka carruurta ee doonaya inay qaataan Shahaadada Digriiga ee Waxbarashada Carruurnimada Hore.

**Deeqaha Baahiyaha ku Salaysan– Kaalmada dhaqaale dadaalada horumarinta tayada**

Deeqda ku salaysan baahiyaha waxaa helaya kaqaybqaatayaasha Early Achievers si ay uga gudbaan caqabadaha si ay u gaaraan darajaynta Heerka 3 ee tayada. Deeqaha lacagta waxaa loo adeegsan karaa in lagu iibsado:

- Agab fasalka oo kor loogu qaadayo dhibcaha ERS ama CLASS
- Wakhtiga beddelka ah
- Horumarinta manhajka iyo qalabka waxbarashada
- Alaabta ama qalabka kale kaas oo lagu horumarinayo tayada barnaamijka